Boston Home Center (Xarunta Taageerada Deganaanshaha Boston) waxay iskaashi la samaynaysaa bangiyada maxaliga ah si ay u siiso **caawimaad dhaqaale oo dheeri ah milkiilayaasha guryaha kuwaas oo raba in ay booskooda ku dhistaan Qayb Hoy Dheeraad ah (ADU)!** Barnaamijka Amaahda Bangiga ee ADU waa barnaamij amaaheed cusub oo loogu talagalay milkiilayaasha guryaha si ay u maalgeliyaan kharashaadka dhismaha ee ADU-dooda.

## Ma igu habboon yahay Barnaamijka Amaahda Bangiga ee ADU?

Haddii aad tahay milkiile guri oo ka kooban 1-, 2-, ama 3-qeyb oo aad adigana dagantahay oo ku yaala Magaalada Boston, ee aad qorsheyneyso inaad gurigaaga ku soo kordhiso ADU, waxa laga yaabaa in aad caawimaad dhaqaale ka hesho Boston Home Center(Xarunta Taageerada Deganaanshaha Boston) iyo mid kamid ah deyn bixiyayaasha nala shaqeeya! Raac **tillaabooyinkeena xiga** si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan u-qalmitaanka iyo sida loo codsado Barnaamijka.

## Talaabooyinka Xiga

1. **OGOW HADDII AAD U QALANTID CAAWIMAAD DHAQAALE**

   Booqo *bit.ly/adu-boston* si aad u hesho liiska dhameystiran ee shuruudaha u-qalmitaanka.

2. **OGOOW TILAABOOYINKA AAD U MAREYSO DHISIDA ADU-gaaga**

   Xaqiijinta helitaanka maalgelinta waa qayb ka mid ah tilaabooyinka dhismaha ee ADU-ga bas. Fiiri Hagaheena ADU-ga (boston.gov/adu-toolkit ) si aad u hubiso inaad haysatid dhammaan xogta aad u baahan tahay si aad u naqshadeyso, u heshid oggolaansho, aadna u dhisto ADU-gaaga.

3. **LAXIRIIR XARUNTA TAAGEERADA DEGANAANSHAHA BOSTON (BOSTON HOME CENTER) SI AAD U BILOOWDO**

   Xareyso codsigaaga adoo isticmaalayo foomkeena onlaynka ah. Sidoo kale waxaad wici kartaa 617-635-4663 ama iimayl u diri kartaa adu@boston.gov hadii aad qabto su'aalo dheeraad ah.